

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo ee Ardayda iyo Qoysaska California

Cusbooneysiintii ugu dambaysay: 16-ka Oktoobar, 2026

1. Maxaa dhacay, oo waa maxay ETS?

ETS waa hay'ad qiimeyn/imtixaan-qaadis oo aan faa'iido doon ahayn, taas oo heshiis kula jirta Gobolka California si ay u bixiso imtixaannada ay sharciyada gobolka iyo kuwa federaalku farayaan ee loogu talagalay dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadweynaha/dowladda ee California. Adeegga ETS wuxuu taageeraa barnaamijyada qiimaynta ee heerka gobol ee California, oo ay ku jiraan Qiimaynta Waxqabadka iyo Horumarka Ardayda ee California (California Assessment of Student Performance and Progress, CAASPP) iyo Qiimaynta Awoodda Luuqadda Ingiriisiga ee California (English Language Proficiency Assessments for California, ELPAC).

Taariikhdu markay ahayd 25-ka Sibteembar, 2026, adeega ETS wuxuu aqoonsaday hawl aan la oggoleyn oo ku lug leh mareegta wareejinta faylalka sugan (SFTP) ee loo isticmaalo in macluumaadka qiimaynta gobolka California oo dhan lagula wadaago CDE.

Adeega ETS waxay joojiyeen akoonkii arrina, waxata ku lug lahaa, hawada ayay ka saareen mareegtii SFTP ee ay dhibaataadu saamaysay, waxayna bilaabeen baaritaan iyagoo kaashanaya khabaro dibadeed oo ku takhasusay amniga internetka. Baaritaanku waxaa lagu ogaaday in cid aan fasax u haysan ay adeegsadeen xog gelitaan oo la jabsaday si ay u galaan mareegta oo ay nuqul ugala baxaan faylal ay ku jiraan xog ku saabsan ardayda gobolka California xilliyo kala duwan intii u dhaxaysay 22-ka Maayo iyo 18-ka Sibteembar, 2026.

Ka dib markii ay la shaqeeyeen hay'adaha sharci-fulinta iyo khabarada amniga internetka, ETS waxay qaadeen tallaabooyin lagu yareynayo khatarta suurtagalka ah ee ah in xogta ay noqoto mid dadweynaha oo dhan ay heli karaan.

Adeegga ETS, kadib kormeer joogto ah oo lagu sameeyay bogga interneetka, tan iyo maanta, ma aysan helin wax caddeyn ah oo muujinaya in macluumaadkaasi loo shaaciyay dadweynaha.

2. Waa maxay macluumaadka ku lugta lahaa?

Macluumaad ku saabsan ardayda California—oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn, dhammaan ardaydii diiwaangashanaa saddexdii sanad-dugsiyadeed ee la soo dhaafay—ayaa la helay, nuqulna laga sameeystay. Macluumaadka la helay oo nuqulka laga sameeystay waxaa ku jiray xogta dadeed ee ardayda, ka qaybgalka barnaamijka, iyo xogta qiimaynta ee ETS ay hayaan marka la eego barnaamijyada qiimaynta gobolka California.

Macluumaadka ardayga ee la helay ama nuqulka lagala baxay wuxuu u kala duwan yahay shakhsiyaadka kala duwan, laakiin waxaa ka mid noqon kara:

- Magaca ardayga, taariikhaha dhalashada, cinwaanada deegaanka/guriga, dugsiyada, degmooyinka, iyo heerarka fasalka.
- Aqoonsiga Ardayga ee Heerka Gobolka oo Dhan (SSID) iyo aqoonsiga ardayga ee heerka deegaan. Aqoonsiga Ardayga ee Gobolka oo Dhan (SSID) waa lambar khaas ah, oo 10-god leh oo si aan kala sooc lahayn loo soo saaray oo loo asteeyo arday gaar ah oo ku jira nidaamka waxbarashada K-12 ee dugsiyada dadweynaha ee California. Wax badan ka ogow barta www.cde.ca.gov/ds/sp/cl/ssid.asp.
- Xogta tirakoob, oo ay ku jiraan jinsiga, isirka ama qowmiyadda, luuqadda koowaad, asal qarameedka, iyo heerka barashada luuqadda Ingiriisiga.
- Naafanimada iyo heerka Qaybta 504, xammilitaanada gaarka ah ee imtixaanada, iyo nooca aasaasiga ah ee naafanimada.
- Heerka u-qalmitaanka ee barnaamijyada soo socda: Cinwaanka I, Qaybta A; Cinwaanka I, Qaybta C; McKinney-Vento; iyo Ardayga Xiriirka La Leh Ciidamada.
- Macluumaadka ku saabsan heerka aqoonta luuqadda Ingiriisiga iyo diiwaangelinta qiimeynta/imtixaanaadka, ka-qaybgalka, iyo natiijooyinka qiimaynta heerka gobol — marka ay khuseeyaan.

Ma ahan in macluumaadkaan oo dhan uusan ku jirin diiwaanka ardayga.

Xogta la galay ee nuqulka laga baxshay kuma jirin lambarrada Soshiyaal Sekiyuuritiga, lambarrada shatiga darawalnimada, lambarrada baasaboorka, macluumaadka koontada maaliyadeed, macluumaadka kaararka deynta ama kaararka koontada caadiga ah ee bangiga, iyo fure-sireedyada koontada. Dhacdadu ma aysan ku lug lahayn xogta shakhsiyeed ee waalidka ama masuulka.

Ka dib markii ay la shaqeeyeen hay'adaha sharci-fulinta iyo khubarada amniga internetka, ETS waxay qaadeen tallaabooyin lagu yareynayo khatarta suurtagalka ah ee ah in xogta ay noqoto mid dadweynaha oo dhan ay heli karaan.

Adeegga ETS, kadib kormeer joogto ah oo lagu sameeyay bogga interneetka, tan iyo maanta, ma aysan helin wax caddeyn ah oo muujinaya in macluumaadkaasi loo shaaciyay dadweynaha.

3. Sidee ayaan ku ogaan karaa in macluumaadkayga ama kan ilmahayga la helay ama nuqul lagala baxay?

ETS, oo ay hayagayaan CDE, ayaa arrintan u sheegayaan ardayda iyo qoysaska macluumaadkooda la helay lana koobyeystay xiligii dhacdada.

Haddii aad hesho warqad ogeysiin iyo/ama iimayl khuseeya dhacdada, tani ayaa ka dhigan in macluumaadkaaga iyo/ama macluumaadka ardaygaaga ay ku jireen faylasha la helay lana koobiyeystay.

In aadan helin wax ogeysiin ah kama dhigna in macluumaadkaaga ama macluumaadka ardaygaaga aysan saamayn soo gaadhin.

Shakhsiyaadka ay saamayntu soo gaadhay waxaa ka mid ah ardayda hadda iyo kuwii hore ee ka diiwaangashan dugsiyada dadweynaha ee California intii u dhaxaysay 2023 iyo sannad-dugsiyeedka hadda lagu jiro, iyo sidoo kale ardaydii ka baxday iskuullada California tan iyo 2006-kii oo aan xaqiijinin inay u soo sheegin CDE inay iskuul kale u wareegeen.

Ogeysiintu waxay sharraxaysaa wixii dhacay, noocyada macluumaadka ee ku lugta lahaa, tallaabooyinka uu Gobolku qaadayo, tallaabooyinka ETS ay qaadayaan, helitaanka adeegyada ilaalinta aqoonsiga, iyo tallaabooyinka aad qaadi karto si aad u ilaaliso macluumaadka gaarka ah.

4. Dhacdadani miyay saamaysay ardaydii hore, oo ay ku jiraan kuwa hadda dadka waaweyn ah?

Haa. Dhacdada ayaa laga yaabaa inay saamaysay ardaydii hore, oo ay ku jiraan balse kuma xaddidna shakhsiyaadka ka diiwaangashanaa dugsiyada California saddexdii sannad-dugsiyeed ee hore.

Ardaydii hore ee ay arrintani saamaysay, oo ay ku jiraan kuwa hadda dadka waaweyn ah, ayaa u-qalma adeegyada ilaalinta aqoonsiga ee dheeraadka ah haddii macluumaadkooda la galay oo la koobiyeystay xilligii dhacdada.

5. Yaa u-qalma adeegyada ilaalinta aqoonsiga ee dheeraadka ah, oo sidee ayaan isaga diiwaangeliyaa?

ETS ayaa adeegyada ilaalinta aqoonsiga ee Experian IdentityWorks oo 24 bilood soconaya ku siinaysa ardayda hadda iyo kuwii hore ee ay arrintu saamaysay ee la helay lana koobiyeystay macluumaadkooda si khrash la'aan ah.

Laba xirmo oo adeeg ayaa diyaar u ah:

- **Ilmaha qaangaarka ahayn ee ka yar 18 jir:** Waalidiinta ama mas'uuliyiinta sharciga ah ayaa ardayda ay arrintani saamaysay ka diiwaangelin kara Experian IdentityWorks Minor Plus. Muddada kamadambaysta ah ee isku diiwaangelinta baddeecada waa marka la gaadho ama kahor 19-ka Maarso, 2027. **Booqo mareegta Experian IdentityWorks si aad isku diiwaangeliso:** www.experianidworks.com/minorplus.

Ilmaha aan qaangaarin ee ay arrintu saamaysay ee 18 jir noqon doona kahor 19-ka Maarso, 2029 ayaa iska diiwaangelin doona baddeecada dadka waaweyn marka ay noqdaan 18 jir iyagoo isticmaalaya koodhka hawlgelinta baddeecada ee qofka weyn ee lagu bixiyay ogeysiinta dhexdeeda.

- **Dadka waaweyn 18 jirka iyo wixii ka weyn:** Dadka waaweyn ee arrintu saamaysay, ee ay ku jiraan ardaydii hore, ayaa si toos ah isaga diiwaangelin kara Experian IdentityWorks. Muddada kamadambaysta ah ee isku diiwaangelinta baddeecada waa marka la gaadho ama kahor 19-ka Maarso, 2027. **Booqo mareegta Experian IdentityWorks si aad isu diiwaangeliso:** www.experianidworks.com/identity.

Tilmaamaha isdiiwaangelinta, oo ay ku jiraan mareegta iyo koodhka hawlgelinta, ayaa lala bixiyay bogga ogeysiinta www.cde.ca.gov/ets.

Diiwaangelinta waxaa lagu siiyaa lacag la'aan qofka ay arrintu saameysay, mana loo baahna kaarka dib-u-bixinta.

Experian sidoo kale waxay bixisaa kaalmada dib-u-soo-celinta aqoonsiga shakhsiyaadka ay arrintu saameysay ee la kulma xatooyada aqoonsiga. Kaalmadani waxaa la heli karaa 24 bilood laga bilaabo taariikhda ogeysiinta mana u baahna in la iska diiwaangeliyo adeegyada kormeerka.

6. Maxaa dhacaya haddii aan helin warqadda ogeysiinta?

In aadan helin warqadda ogeysiinta macnaheedu ma ahan in macluumaadkaagu aysan saamayn soo gaadhin. Qaar ka mid ah ardayda hadda dhigata iyo kuwii hore ayaa laga yaabaa in aysan helin ogeysiin, gaar ahaan haddii macluumaadka xiriirkooda uu isbeddelay.

Shakhsiyaadka ay saamayntu soo gaadhay waxaa ka mid ah ardayda hadda iyo kuwii hore ee ka diiwaangashan dugsiyada dadweynaha ee California intii u dhaxaysay 2023 iyo sannad-dugsiyeedka hadda lagu jiro, iyo sidoo kale ardaydii ka baxday iskuullada California tan iyo 2006-kii oo aan xaqiijinin inay u soo sheegin CDE inay iskuul kale u wareegeen.

Booqo www.cde.ca.gov/ets si aad u hesho macluumaad ku saabsan adeegyada ilaalinta aqoonsiga, iyo tilmaamaha si aad kaalmada u hesho.

7. Maxay dadka ay saameysay arrinta sameyn karaan si ay u ilaaliyaan macluumaadkooda?

Waxaan ku dhiirigelinaynaa shakhsiyaadka samayntu gaadhay inay tixgeliyaan inay iska diiwaangeliyaan adeegyada ilaalinta aqoonsiga oo ay ka feejignaadaan suurtagalnimada in si khaldan loo isticmaalo macluumaadka gaarka ah ee ardayga.

Waa habdhaqan wanaagsan in mar walba laga digtoonaado iimayllada, farriimaha qoraalka ah, ama wicitaannada talefoon ee aan la filayn ee ka hadlaya dugsiga ardayga, imtixaannada heerka gobol, ama dhacdadan. Ha wadaagin macluumaad shakhsiyeed, erayada sireed, ama xog maaliyadeed markaad ka jawaabayso codsiyo aadan horay u dalban. Xaqiiji cinwaanada bogga internetka ka hor intaadan gelin macluumaadka shakhsi ahaaneed si aad isugu diiwaangeliso adeegyada ilaalinta aqoonsiga.

Dadka waaweyn waxay ka heli karaan warbixinnada deynta oo bilaashka ah barta www.annualcreditreport.com ama iyagoo wacaya 1-877-322-8228. Dadka waaweyn waxay xannibaad amni oo bilaash ah saari karaan faylashooda deynta.

Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ayaa sidoo kale ka fiirsan kara inay codsadaan xannibaadda deynta ee bilaashka ah ee loogu talagalay carruurtooda ka yar 16 jir si looga hortago in akoonno aan la oggolayn lagu furo magacooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan warbixinnada deynta, digniinaha khiyaanada, iyo xannibaadaha amni, la xiriir:

- Equifax: 800-685-1111 | www.equifax.com
- Experian: 888-397-3742 | www.experian.com
- TransUnion: 833-799-5355 | www.transunion.com

Inkastoo lambarrada Sooshiyal Sikuutariga iyo macluumaadka akoonnada maaliyadeed aysan ku lug lahayn, haddana waxaa la dhiirigelinayaa in la qaado taxaddarro lagu ilaalinayo macluumaadka gaarka ah.

8. Sideen ku ogaan karaa in wadaxidhiidhka khuseeya dhacdadan uu yahay mid sharci ah?

Ka digtoonow iimayllada lama filaanka ah, wicitaannada talefoon, ama farriimaha qoraalka ah ee sheegaya inay ka yimaadeen ETS, CDE, ama Experian oo ku saabsan dhacdadan.

Ha bixin lambarrada Sooshiyal Sikuuritigga, fure-sireedyada, xogta maaliyadeed iyo macluumaadka kale ee xasaasiga ah markaad ka jawaabayso codsiyo aadan horay u dalban.

Dadka ay saameysay waxay heli doonaan tilmaamo khuseeya iska diiwaangelinta adeegyada ilaalinta aqoonsiga ee bilaashka ah ee la socda warqadahooda ogeysiinta ah. www.cde.ca.gov/ets.

Isdiiwaangelintu waa bilaash mana u baahna kaarka dib-u-bixinta.

Haddii aadan hubin in wadaxidhiidhku uu sharci yahay iyo in kale, booqo bogga rasmiga ah ee dhacdada CDE ee ku jira www.cde.ca.gov/ets si aad u hesho wixii macluumaad ah.

9. Maxay ETS iyo gobolku ka qabanayaan wax-ka-qabashada dhacdada iyo kahortagga dhacdooyinka mustaqbalka?

Markii la ogaaday dhacdada, ETS waxay qaadeen tallaabooyin badan oo lagu xoojinayo amniga mareegta SFTP, oo ay ka mid yihiin in mareegta laga saaro khadka (offline) iyo in la dhiso mareeg SFTP ah oo gebi ahaanba cusub, taasi oo leh habab ammaan oo la xoojiyey. ETS waxay sii wadaan qiimeynta tallaabooyin ammaan oo dheeraad ah oo laga yaabo inay habboon yihiin.

Ka dib markii ay la shaqeeyeen hay'adaha sharci-fulinta iyo khubarada amniga internetka, ETS waxay qaadeen tallaabooyin lagu yareynayo khatarta suurtagalka ah ee ah in xogta ay noqoto mid dadweynaha oo dhan ay heli karaan. Intaa waxaa dheer, ETS, ka dib kormeerida joogtada ah ee bogga internetka, weli ma aysan helin wax caddeyn ah oo muujinaya in macluumaadkaas loo shaaciyay dadweynaha.

CDE iyo Guddiga Waxbarashada ee Gobolka (SBE) ayaa la shaqeynaya khubarada amniga xogta ee gobolka si ay u qiimeeyaan saameynta ay dhacdadani ku yeelatay ardayda iyo qoysaska ku nool California iyo si ay u hubiyaan in dadka ay saameyntu gaartay ay u helaan macluumaadka iyo taageerada ku habboon.

Xarunta Isku-dhafka Amniga Internetka ee California (California Cybersecurity Integration Center, Cal-CSIC) ayaa gacan ka geysanayso baaritaannada dhijitaalka ah iyo ka jawaabista dhacdooyinka. Waaxda Teknoolojiyadda ee California (California Department of Technology, CDT) iyo Xafiiska Adeegyada Gurmada ah ee Guddoomiyaha California (California Governor's Office of Emergency Services, Cal OES) ayaa sidoo kale taageeraya jawaabta gobolka ee dhinacyada farsamada, sharciga, iyo hawlgallada.

CDE iyo SBE ayaa sidoo kale dib u eegaya dhacdada iyo sida ay ETS ugu hoggaansan yihiin shuruudaha khuseeya amniga xogta iyo waajibaadka qandaraaska.

10. Maxay ETS u heshay macluumaadkan?

ETS waa hay'ad qiimeyn/imtixaan-qaadis oo aan faa'iido doon ahayn, taas oo heshiis kula jirta Gobolka California si ay u bixiso imtixaannada ay sharciyada gobolka iyo kuwa federaalku farayaan ee loogu talagalay dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadweynaha/dowladda ee California.

Macluumaadka la helay oo nuqulka laga sameystay waxaa ku jiray xogta tirakoob ee ardayga, kaqaybgalka barnaamijka, iyo xogta qiimaynta ee ETS ay hayaan marka la eego barnaamijyada qiimaynta gobolka California.